



Waxbarashada Dadka-waaweyn



Waxbarashada dadka waaweyn ee Australia



Halkan australia, dadku waxay u arkaan barashada sidii wax aad samaynayso noloshaada oo dhan.



Xataa markaad tahay waayeel, waxaad:

- sii wadysaa inaad waxbarashda
- baranaysaa
- aadysaa dugsiga marka kowaad



Barashada ku-hadlidda, aqrinta iyo qoridda Ingiriisiga waa muhiim.



Waxay kaa caawinaysaa inaad:

- ka-qaybqaadato nolosha Australia



- ka dareento wanaag noloshaada halkan Australia



- shaqo hesho



- inay ku siiso fursado wacan

Barashada Ingiriisiga



Dowladdu waxay kugu caawinaysaa inaad ka barato Ingiriisiga Barnaamijka Ingiriisiga Soogalootiga Dadka-waaweyn (Adult Migrant English Program - AMEP).



Kuma kacayso wax lacag ah.




Waxaad baran kartaa Ingiriisiga ilaa 510 saacadood.



Waxaad u baahan tahay inaad isku-diiwaangeliso AMEP 6da bilood ee ugu horreysa aad Australia timaado.



Waxaa jira Childcare lacag la'aan ah ee loogu talagalay carruurta yaryar kaas oo aad adeegsan kartid intaad fasalka dhiganayso.



Waxaa jira siyaabo kala duwan oo aad uga qaybqaadan karto AMEP haddii aad:

- doonayso inaad shaqayso



- daryeesho qoyskaaga



Waxaad yeeli kartaa inaad:

- adoo guriga jooga aad wax barato



- hesho bare-guri kaas oo kugu soo booqan doona gurigaaga kuna caawinaya



- dhigato fasallada waqtiga-dhimman



- dhigato fasallada kadib saacadaha shaqada



Waxaad ka heli kartaa macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan AMEP website-ka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka (Department of Education and Training).

www.education.gov.au/amep

Waxbarashada kale



Dadka waaweyn oo doonaya inay sii wadaan waxbarashadooda waxay heli karaan waxyaalla kala duwan oo badan.

Dadka waxbaranaya waxaa loo yaqaan arday.



Waxaad yeeli kartaa inaad caawimaad ka hesho Dowladda si aad u bixiso qarashka waxbarashada.



Taasi waxay ku xiran tahay:

- dakhliga – intay le'gtahay lacagta kaa soo gasha shaqada



- hantida – waxaad leedahay iyo intay le'egtahay lacagta kuugu jirta bangiga.



Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Website-ka Wasaaradda Adeegyada Aadamiga (Department of Human Services - DHS).

www.humanservices.gov.au

Dhamaynta dugsiga sare

18+

Weli waad sii dhammadhsan kartaa dugsiga sare haddii aad ka weyn tahay 18 sano jir.




Dugsiga sare waxaa badanaa looga yaqaan halkan Australia Dugsi sare.



Waxaad wax ka baran kartaa Koleejka Taknikada iyo Waxbarashada Dheeraadka ah (Technical and Further Education - TAFE).



Waxaad qaadan kartaa Shahaadada IV.



Shahaadada IV waxay u-dhiganta heerka dugsiga sare ee waxbarashada.

Barashada xirfadda ama mihnada



Shaqooyinka qaarkood waxay u baahan yihiin in la barto xirfado gaar ah.

Kuwaasna waxaa loo yaqaan mihnado.



Mihnadaha waxaa ka mid ah:

- najaaradda



- biyo-gelinta



- qurxinta-timaha



- jardiinaynta dhulka



- ka-shaqaynta ganacsiga



- dalxiiska



- martigelinta




Waxaad ka baran kartaa xirfadaha aad uga baahan tahay mihnadda adoo gala (Vocational Education and Training - VET).



Waxaad ka samayn kartaa VET Kooleejka TAFE-ka.



Waxaad u baahan tahay shahaado dugsi sare.



Waxaad u baahan doontaa inaad bixiso khidmaddaha:

- dhigashada fasallada



- buugaagta aad u baahan tahay

Shaqo-ku-tababarid



Waxaad baran kartaa mihnad adoo u maraya shaqo-ku-tababarid.



Shaqo-ku-tababaridu waxaa ka mid ah:

- ka-shaqaynta shaqada
- ku tababaridda xirfadaha aad u baahan tahay inaad ku shaqaysato



Waxaad awoodi doontaa inaad samayso shaqo-ku-tababarid haddii aad leedahay xirfadaha saxda ah si aad u bilowdo.



Markii aad dhamayso shaqo-ku-tababaridda waxaad leedahay aqoontii laga aqoonsan yahay Australia oo dhan.



Shaqo-ku-tababaridda waxay kuu ogolaanaysaa inaad lacag shaqayso intaad waxbaranayso.




Waxaad u baahan tahay inaad bixiso khidmadaha fasallada aad ku tababarato. Khidmaduhu way u kala duwan yihiiin meelaha kala duwan.



Waxaad ka heli kartaa macluumaaad badan oo ku saabsan koleejka TAFE-ka aad tegi karto garwadeenkaaga ama qofkii ku isboonsaray.

Dhigashada jaamacadda



Waxaa Australia ka jira noocyoo kala duwan oo jaamacado ah.

- kuwa dadweyne
- kuwo gaar ah



Waxaad u dhigan kartaa jaamacadda sidii:

- arday heerka kowaad ah
- arday heerka labaad ah

Ardayda heerka kowaad ah



Ardayda heerka kowaad ah waa ardayda gasha jaamacadda waqtiga ugu horreeya.


Jaamacaduhu waxay leeyihiin:

- boosas la kabo – Dowladda ayaa ka caawisa qarashka
- boosaska la bixiyo khidmadda oo buuxda – ardaygu wuxuu bixiyaa qarashka oo dhan



Hadba ayadoo ku xiran koorsooinka ay bixiyaan, jaamacaduhu waxay u ogolaadaan ardayda cusub inay bilaabaan:

- Janaayo/Febaraayo
- Luuliyo/Agoosto



Jaamacadaha qaarkood waxay kaloo leeyihiiin koorsooyinka waqtii kulaylahaa.




Si aad u gasho jaamacadda waxaad u baahan tahay inaad:


- samayso imtixaano yaryar iyo kuwo weyn



- muujiso sida uu u fiican yahay Ingiriisigaagu




- caddayso wixii daraasado oo aad hore u soo qaadatay



- samayso koorsada kabidda ee jaamacadda – fasallada kugu caawinaya inaad u diyaargarowdo daraasadaha jaamacadeed



Waxay ku kacaysaa lacag fara badan si aad wax uga barato jaamacadda halkan Australia.



Barnaamijka Daynta Waxbarashada Sare (Higher Education Loan Program - HELP) waxay kugu caawin kartaa qarashka.



Haddii aad adeegsato HELP, waxaad bixinaysaa waxbarashadaada kadib markaad dhammaysato – markii aad shaqayso oo qaadanayso lacag kugu filan.



Waxaad ka heli kartaa maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan HELP website-ka Caawimaada-waxbarashada (StudyAssist).

www.studyassist.gov.au

Ardyada heerka labaad



Ardyada heerka labaad waa arday kuwaas oo ku noqda jaamacadda si ay usii sameeyaan waxbarasho dheeraad ah kadib markay qalin-jebiyaan – oo digrii qaataan.



Haddii aad dibadda kusoo qalin-jebisey, jaamacaddu waxay hubin doontaa shahaadooyinkaaga.

Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka waxay ku siin kartaa maclumaadka ku saabsan sida digriigaaga loogu aqoonsado halkan Australia.



Waxaad ka heli kartaa maclumaad dheeraad ah haddii aad ka raadiso ‘Qualifications recognition’ ee website-ka Wasaaradda Waxbarshada iyo Tababarka (Department of Education and Training).
www.internationaleducation.gov.au



Waxaad awoodi doontaa inaad samayso koorso kabid ah taas oo kugu caawin doonta inaad hesho shahaado heerka Australia ah.

Dhigashada fasalo iyo koorsooyin dheeraad ah



Waxaad ka heli kartaa koorsooyin iyo fasalo bulshadaada dhexdeeda kuwaas oo ku saabsan waxyalaha aad doonayso inaad barato.



Waxaad ka samayn kartaa:

- dugsiyada




- koleejooinka bulshada



- TAFE-ka



- jaamacadaha



Waxaana ka mid ah:


- karinta




- Ingiriisiga ama luqadaha kale



- qoob-ka-cayaarka



- sawiridda



- xirfadaha kombiyuutarka



- xisaabinta – maaraynta lacagtaada



- caafimaadka iyo



- xirfadaha shaqada ee waxtarka ah



Koorsooyinkan kuma siinayaan shahaadooyin rasmi ah.



Waxaad samayn kartaa koorsooyinka noocan ah:

- ka-dib saacadaha shaqada



- weekendiga



Qaar ka mid ah xaruumaha maclumaadka soogalootiga iyo haya'daha adeegga waxay maamulaan koorsooyinkan.

Waxbarashada qoyska oo dhan ah




Maktabadaha dadweynaha degaanka waa meelo fiican oo laga helo maclumaadka.



Wax qarash ah kuugu kicimayso inaad ka mid noqoto maktabadda.

Waxaad amaahan kartaa:




- buuggaagta



- wargeesyada



- fiidiyowga iyo DVDs



- CDs



Badiba maktabadahu waxay leeyihiiin:

- kombiyuutaro
- helidda intarneedka lacag la'aanta



Waxaad awoodi doontaa inaad adeegsato kombiyutarka muddo gaaban.



Waxaad u baahan kartaa inaad waqtiballansato si aad u isticmaashokombiyutarka.



Waxaa muhiim ah in la raaco xeerarka maktabadda.



Waxaad u baahan tahay inaad ku soo-celiso waxyaalaha aad amaahatay waqtigooda.

Haddii aadan ku soo-celin waxyaalahaas waqtigooda waxaa lagaa codsan doonaa inaad bixiso xoogaa ganaax ah.

Xannaanada ilmaha



Waxaad adeegsan kartaa adeegyada childcare-ka haddii aad doonayso inaad:

- shaqayso
- waxbarato
- aado tababar aad u qaadato shaqadaada



Garwadeenkaaga ama qofkii ku isboonsaray ayaa kaa caawin doona inaad hesho llaalinta caruurta kugu habboon.



Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan childcare-ka iyo adeegyada waxbarashada hore website-ka MyChild.

www.mychild.gov.au

